

Ujeedo: Magacaabis Gudiga Lasocodka Xaalada Cudurka Karoona ee Wilaayaadka Islaamiga.

20 Ramadan 1441H (13-May-2020)

Iyadoo laga ambaqaadayo xaaladaha caafimaad darro ee kusoo korortay dunida, gaar ahaan cudurka Korona ee boqolaalka kun ee qofood ku dilay dunida dalacalladeeda, saamayntiisuna ay soo gaartay bariga Afrika ayaa waxaa arinka cudurkaas kulamo ka yeeshay Maktabka Siyaasada iyo Wilaayaatka ee Xarakada Al-Shabaab Al Mujaahidiin.

Mas'uuliyiintii kulamada kasoo qayb galay ayaa isla falanqeyay cudurka iyo saameeynta uu ku yeeshay deegaano kamid ah dhulka Soomaaliya, taasoo sababatay dhimashada qaar kamid ah dadkii uu cudurka ku dhacay, halka qaar kale oo farabadana ay la xanuunsanayaan.

Sidaas daraadeed, maadaamada ummada Muslimiinta ah ay yihiin bulsho nolol-wadaag ah kana dhexeeyaan dano farabadan isku socodkooduna badanyahay ayaa arintaas waxay keeni kartaa in cudurku kasoo gudbo dhulalka iyo wadamada uu hadda ka jiro uuna soo gaaro deegaanada ka fayooow hadda ee aanu weli saamaynta ku yeelanin.

Hadaba, iyadoo laga duulayo masuuliyada ka saaran Wilaayaatka Islaamiga ah ilaalinta bad-qabka caafimaadka dadka Muslimiinta ah ayaa waxaa la magacaabay Guddiga Lasocodka Xaalada Cudurka Karoona ee Wilaayaatka Islaamiga ah.

Gudigan oo ka kooban todoba xubnood oo iskugu jira dhakhaatiir, culumo iyo waxgarad, ayaa waxa loo xilsaaray in ay ka hawlgalaan ka warqabka xaaladaha caafimaad ee Wilaayaatka iyo ka talabixinta hadba wixii soo kordha.

Gudiga Lasocodka Xaalada Cudurka Karoona ee Wilaayaadka Islaamiga wuxuu shaqo bilaabayaa marka uu soo baxo bayaanka ogeysiinta ah

Waxaa dhamaan Maamullada Wilaayaatka Islaamiga ah lafarayaa inay gudigaas la shaqeeyaan, una fududeeyaan wixii hawlo ah oo ay uga baahdaan.



وَلِلَّهِ الْعِزَّةُ وَلِرَسُولِهِ وَلِلْمُؤْمِنِينَ وَلَكِنَّ الْمُنَافِقِينَ لَا يَعْلَمُونَ

"But honour belongs to Allah and His Messenger, and to the Believers; but the Hypocrites know not"